

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 19^{AAD}

CADADKA 8^{AAD}

TAARIIKH: 27/11/2019

Lam. 06

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

SHARCIGA GUDDIGA DOORASHOYINKA KU MEEL GAARKA AH
EE DOWLADDA PUNTLAND

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah</i> Ansixinta Guddiga Doorashada KMG ee Dowladda Puntland
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha</i> <i>Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNE
KU-XIGEENKA



ولاية بونت لاند الصومالية
الرئاسة
مكتب نائب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

XEER KUSIME MADAXWEYNE Lr 18, December 01, 2019

Sharci Lr.5 ee December 01, 2019, kuna saabsan Sharciga Guddiga Doorashooyinka ku Meel Gaarka ah ee Dowladda Puntland.

K/S Madaxweynaha Dowladda Puntland ahna Madaxweyne Ku-Xigeenka Dowladda Puntland

MARKUU ARKAY: -Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^{aad}

MARKUU ARKAY: - Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay **XGGW/DPL/121/2019**, kuna taariikhaysan **16/11/2019**.

MARKUU TIXGELIYEEY: - Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

Wuxuu soo saaray

Sharciga Soo Socda:-

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeeyn **Sharciga Guddiga Doorashooyinka ku Meel Gaarka ah ee Dowladda Puntland.**

Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (**Original**) waxaa lagu kala kaydinaayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

Qodobka 3^{aad}

Dhaqan-gal Sharcigan wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

Axmed Cilmi Cismaan (A.Karaash)

K/S Madaxweynaha ahna Madaxweyne Ku-Xigeenka Dowladda Puntland

Tell: 0906715550

E-mail. vp@plstate.so

website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tbc- XGGW/DPL/121/2019 Garoowe, Sabti **Taariikh:- 16/11/2019**

Kur- Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Guddiga Doorashada KMG ee Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Lifaaqa 1-aad ee Dastuurka faqradiisa 1-aad

MARKUU ARKAY:-

Xeerka guddiga Doorashada KMG ee DPL, xeer
L.r 9 Qodobkiisa 3-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gubinta Madaxweynaha DPL ee
MW/DPL/293/2019 ee November 2019, kuna
saabsanayd xasaanadsiinta Xubnaha Guddiga
Doorashada Puntland

MARKUU TIX-GELIYEY:-

Baahida loo qabo ansixinta Guddiga.

MARKUU ARKAY:-

Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey
Guddiga Doorashada DPL, Kalfadhiga 45-aad
fadhigiisa 12-aad ee 16/11/2019

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Xubnaha Guddiga Doorashada KMG ee Puntland oo kala ah;

1. Guuleed Saalax Barre
2. Jaamac Xirsi Faarax
3. Cabdinuur Shiikh Maxamed Isxaaq
4. Cali Jaamac Faarax
5. Sahra Jaamac Saalax
6. Cabdillaahi Faarax Mire
7. Xafso Salaad Maxamed
8. Cabdillaahi Cabdi Ducaale
9. Cabdirisaaq Axmed Siciid

Allaa Mahad Leh

Md. Abwaan Cabdirashiid Yuusuf Jibriil

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

